



## Kormeeraha guud oo la qorsheeyay in uu yimaado Kulanka 14<sup>-aad</sup> ee Born (in)

Sanadkii labaad ee isku xigta, Dugsiyada Dadweynaha Portland Kormeerahooda guud Guadalupe Guerrero ayaa bixin doona hadalka soo dhaweynta ee Kulanka Dhammaantood Way Ku Dhasheen 'All Born (in)' ee Hababka ugu Fiican ee Ka qayb galinta Waxbarashada ee Naafanimada Kala duwan marka soo bandhiga dhacdadii 14<sup>-aad</sup> Sabtida, Abriil 6 lagu qabto Huteelka Holiday Inn Portland Airport.

Kulanka waxaa lagu celceliyay in uu yahay ilo muhiim ah oo la xiriirta Northwest oo loogu talagalay waalidiinta iyo xirfadlayaasha ee dhanka waxbarida iyo dhiirigelinta ka mid noqoshada dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan dadka qaba naafanimada maskaxda/korriinka, ee ku jira dugsiyada xaafadda.

Dhacdadu waxay soconaysaa 7:45 subaxnimo ilaa 6 galabnimo iyada oo lagu soo bandhigi doonaa 30 aqoon isweydaarsi oo gaarsiisan carruurnimada hore ilaa u gudbida kulliyadda, wax soo bandhigis muhiim, marti gaar ah, madadaalo, farshaxan la gadayo iyo waxyaabo dheeraad ah. PPS ayaa horseed ka ah bixinta lacagta ku baxaysa kulanka.

Kulanka sanadkani waxaa lagu soo bandhigi doonaa qofka muhiim ee LeDerick Horne oo hadli doona, oo ah farshaxaniiste iyo u doode la ogaaday in uu leeyahay naafanimada dhanka waxbarashada isaga oo dhigta fasalka saddexaad isla markaana la geliyay fasallo dadka la kala soocayay, balse noqday qof tusaale ah oo lagu daydo iyo dhexdhexaadiye u dhexeeya wax barayaasha iyo hoggaamiyayaasha.

Marka laga soo tago hadalkiisa soo dhaweynta inta lagu jiro saacada quraacda, Kormeeraha guud Guerrero wuxuu ka qayb qaadan doonaa dood la guddoominayo oo cinwaankeedu yahay, "Isbeddelka Nidaamyo Loo wada dhan yahay; Gaarista iyo wax barista ilmo kastaa waxay inagu qaadataa in aan dhammaanteen sidaasi samayno."

Sidoo kale ka tirsan PPS, Noelle Sisk, oo ah U doodaha Guusha Ardayga ee dhanka Waxbarashada Gaarka ah, ayaa ka qayb qaadan doona laba aqoon isweydaarso, oo cinwaankoodu yahay "Isbeddelka Nidaamyo Loo wada dhan yahay; Gaarista iyo wax barista ilmo kastaa waxay inagu qaadataa in aan dhammaanteen sidaasi samayno," iyo "Sida Loo Isticmaalo Hadafyada marka ay noqoto IEP si Loo Maareeyo Guusha dhanka Meelaynta Loo wada dhan yahay."

Si aad qayb gasho kulanka, [iska diiwaangeli website-ka](#) muddo aan ka dambeyn Abriil 4. Lacagtu waxay u dhaxaysaa \$95 ilaa \$110, iyada oo qaar ka mid ah deeqaha waxbarasho oo qayb ahaan ah ay heli karaan qoysaska ay haysato dhibaato dhaqaale.